













**Maxaa ka reeban iibinta ama
gadista guryaha ee ku salaysan
Kooxaha La Ilaaliyo Xuquqdooda*?**

-  diidmo iibin ama heshin guri
-  In aan lagu diyaarin guri
-  In loo dhigo shuruudo ama xaalado gaar ah ee ka hor iistaagaya
-  In aan lala simin dadka kale ama loo diido dillaalka dhulka
-  In la inkiro in guriga la arko ama uu beec yahay laga qariyo
-  In lagu adkeeyo ama loo fududeeyo in uu ka helo guri xaafado gaar ah
-  In lagu qalqaaliyo qofka iska leh guriga in uu ku iibiyo ama ku ijaaro qiime ka yar suuqa
-  In laga dafiro in uu qofku ka mid noqdo ururada guryaha iwm (sida kuwa soo saarta liiska guryaha) ee la xiriira iska iibinta guryaha
-  In loo diido in la siiyo deyn guri ama laga qarriyo akhbaarta deymaha ama la dul saaro shuruudo ka duwan dadka kale
-  In la takooro xagga qiime koroka guryaha
-  In la handado, la baqdin galiyo ama la ciqaabo ama laga hor istaago qof kasta ee xuquuqdiisaan doonayaa
-  In la xayeysiyo ama la sheego ceebo am wanaag ku salaysan Kooxaha la Ilaaliyo Xuquqdooda* (ee aan ka ahayn guryaha dadka waayeelka). Arrintan waa ay ka siminyihiin iibiyeyaasha oo dhan

**Waxaa ka reeban (arrimiha kore,
hadii aan si gaar ah loo caddayn):**

- Guryaha dadka waayeelka (xagga kala saarista da'da)
- Guriga hal qoys ayada oo aan la isticmaalin dillaal
- Guryaha ay maamulaan Ururrada iyo kooxaha gaarka ah ee gaar guryahooda uga dhiga dadka ka tirsan ururkooda

**Yaad La xiriirin haddii aad
dareento in lagu takooray ama si
aan xaq ahayn laguula dhaqmay?**

Housing Discrimination Law Project

Legal Aid – West Metro
2929 Fourth Avenue, S.
Minneapolis, MN 55408
612-827-3774

HELP – Housing Equality Law Project

SMRLS – East Metro
166 E. Fourth Street
St. Paul, MN 55101
651-222-4741

Minneapolis Area Association of Realtors

5750 Lincoln Drive
Minneapolis, MN 55436
952-933-9020

Minnesota Department of Human Rights

190 E. Fifth Street
St. Paul, MN 55101
651-296-5663

Minneapolis Civil Rights Department

(Minneapolis transactions only)
350 S. Fifth Street, #239
Minneapolis, MN 55415
612-673-3012

St. Paul Department of Human Rights

(St. Paul transactions only)
15 W. Kellogg Avenue #900
St. Paul, MN 55102
651-266-8966

**US Department of Housing & Urban
Development (HUD) Fair Housing
Enforcement Center**

920 S. Second Avenue, #1300
Minneapolis, MN 55402
612-370-3185 or 1-800-765-9372

Minnesota Attorney General's Office

445 Minnesota Street
1400 NCL Tower
St. Paul, MN 55101
651-296-3353



**HXuquuqda
Sinaanta Guri
Lahaanshaha**

Waxaa soo Diyaariyeye
**Community Action
for Suburban Hennepin**
33 Tenth Avenue South, #150
Hopkins, MN 55343
952-933-9639
www.capsh.org

Macluumaadkan waxaa lala
kaashaday deeq ka timid
Hennepin County Housing,
Community Works, and Transit

Macluumaad dheeraad ah
haddii aad u baahatid ka fiiri:
www.cashenn.org

Qeexid (Definitions):

Takoor waa dadka ama kooxaha oo aan si siman loola dhaqmin sababtoo ah ka tirsanaantooda *Kooxaha sida gaarka ah loo Ilaaliyo**

Kooxaha/Qeybaha sida gaarka ah loo Ilaaliyo: Waa dad qeybsada asal ama iin (disability) ee laga ilaalinayo takoor la xiriira astaamaha kooxahaas u gaarka ah. Fiiri shaxda hoose; marka laga hadlaayo ***Kooxaha sida gaarka ah loo Ilaaliyo**** waxaa kale oo ka mid ah kuwa shaxdan ku qorran.
Sinaan Guri: Isdhaafsiga guryaha (iibsashada iyo iska iibinta guryaha) ee ka madax bannaan falal takoor ah

<i>Kooxaha sida gaarka ah loo Ilaaliyo*</i>	Sharcigee ilaalinaya?			
Dhalasho	▲	⊙	❖	⊠
Jinsi(sex)	▲	⊙	❖	⊠
Diin	▲	⊙	❖	⊠
Xaaladda qoyska (caruur ka yay 18 qoyska ka mid yihiin)	▲	⊙	❖	⊠
Disability	▲	⊙	❖	⊠
Asal (dhalasho)	▲	⊙	❖	⊠
Midab	▲	⊙	❖	⊠
rumeysnaan		⊙	❖	⊠
Jinsiga uu jecelyahay		⊙	❖	⊠
Isku asal			❖	⊠
Xaas iyo doobnimo		⊙	❖	⊠
Ceyrta Qaata		⊙	❖	⊠
Da'da				⊠

- ▲ Xeerka Federaalka ee sinaanta guryaha
- ⊙ Xeerka xaquuqda aadamiga ee Minnesota
- ❖ Xeerka Madaniga ee Minneapolis
- ⊠ Xeerka Xuquuqda aadanaha ee St. Paul

XUQUUQGA IYO WAAJIBAADKA XEERKA SINAANTA GURYAHA

Guryaha dadka oo dhan xaq ayay u leeyihiin. Sinaanta guryaha waxaa loola jeedaa in aan cidna laga takoorin xagga iibsiga iyo gadidda guryaha sida ku salaysan xaquuqda *Kooxaha sida gaarka ah loo ilaaliyey** ee xagga isweydaarsiga guryaha. Waxaa kale oo loola jeedaa sinaanta guryaha in aan sina loo takoorin kooxaha sida gaarka loo ilaaliyo xaquuqdooda marka ay dalbanayaan deynta guryaha ayaad oo sabab looga dhigayo in ay ka mid yihiin kooxahaas ama uu qofku dakhligiisa qaar ama gebi ahaanba uu ka yimaado ceyr qaadasho.

Qofka Guriga Ibsanaya (For the Home Buyer):

Waxaad xaq u leedahay in aan sina lagaaga takoorin iibsashada guryaha ayada oo lagu salaynayo *Kooxaha sida gaarka ah loo Ilaaliyo** Xuquuqdaas waxaa ka mid ah:

- Guryaha oo laga siiyo qiimaha ay ka joogaan takoor la'an
- Hay'daha guryo iibinta oo aan laga takoorin
- In aad heshid doorasho ballaaran ee guryaha iyo meelaha ay ku yaalaan
- In aan lagaa takoorin xagga deymaha guryaha, caymiska iyo qiime koroka (iska iibinta) iyo xaaladah iska iibinta
- Intii macquul ah in la siiyo fududeyn dadka iimaha leh (disability)
- In aan la handadin ama lagana baqdin galin qofka fulinta xuquuqdiisa sinaanta guryaha.

Qofka iska libinaya (For the Home Seller):

- Waxaad sharcigu ku farayaa in aadan kala soocin dadka marka aad iska iibinaysid guriga adiga oo ku saleynaya *Kooxaha sida gaarka ah loo Ilaaliyo**
- Qofka dilaalka kuu iibinaya waa in uu ku dhaqmaa xeerka sinaanta guryaha.
- Guri diyaar ah waa in aadan ka qarin dadka adiga oo leh diyaar ma ahin. Taas waxay jabinaysaa xeerka xuquuqda guryaha.
- Waa in aadan kala soocin dadka marka aad iibinaysid guriga ama iidhehda u sameynaysid adiga oo ku saleynaya dhalsho, jinsi kala sooc, diin, xaalad qoys, iin, nooca jinsi uu jecelyahay, asal, ama xaas iyo doobnimo.

Qofka Dilaalka ah (For the Real Estate Broker/Agent):

Cidna ma takoori kartid mana bixin kartid macluumaadka *kooxaha xuquuqdooda la Ilaaliyo**. Lama ogola in aad aqbishid takoor iyo akla sooc uu ku faro qofka iska iibinaya guriga.

Deyn Bixiyeyaasha (For Mortgage Lenders):

Waxaa waajib kuga ah in aad raacdid sharciyada sinaanta guryaha oo dhan. Cidna uma diidi kartid deyn guri ama in aad siisid macluumaad la xiriira deymaha. Sidoo kale shuruudo ka duwan dadka kale ma saari kartid deynta Kooxaha Xuquuqdooda la Ilaaliyo*.